


BARBAARINTA HORE 0-6

Cunnug walba wuxuu xaq u leeyahay barbaarinta hore (waxey u baahantahay inaad degmo ka diiwaan gashantahay), halkaas oo lagu daryeelayo cuntada, banaan u bixidda, ciyaarta iyo nasashada.

La shaqeynta shaqaaluhu waxay ka taageereysaa waalidiinta doorkooda tarbiyeed. Ilmuhu inuu ka qeyb qaato barbaarinta hore waxay u suurtoogelineysaa waalidka inay waxbartaan ama shaqeystaan.



Ka qeyb qaadashada barbaarinta hore waa u muhiim ilmahaaga dhinaca kobociisa gebi ahaanba. Wuxuu baranayaa la xiriirka iyo xirfadaha dhex galka bulshada, wuxuuna khibrad u yeelanayaa qeyb ka-ahaanshaha kooxaha carruurta.

Dhammaan waxaa loo helayaa qaabab u gaar ah oo wax lagu baro, xataa haddii ay waxbarashadu ku adag tahay. Ilmaha waxaa loo diyaarinayaa qalabka ay u baahan yihiin iyo adeegyada u turjumidda (kuwa maqalka- iyo araga naafada ka ah).

WAXBARASHADA HORE 6 sano

Cunnug walba wuxuu xaq u leeyahay inuu ka qeyb qaato waxbarashada hore inta uunan iskuulka bilaabin. Hadafka waxbarashada hore waa horey u marinta ilmaha kobociisa iyo qaabka habboon ee ilmaha wax loo barayo.

Waxbarashada, korriinka, qadada, qalabka waxbarashada iyo adeegyada dareelka waxbarashada (tusaale. kalkaalisadda caafimaadka fayodhowrku) waa lacag la'aan.



Waxbarashada hore ilmuhu wuxuu niyad u hayaa inuu tijaabiyo oo uu barto waxyaalo cusub. Ilmahaaga wuxuu fursad u haystaa la xiriirka iyo xirfadaha bulshada xoojintooda oo dhinacyo badan.

Wuxuu helayaa u diyaarsanaan marinka iskuulka ah wuxuuna xoojinayaa xirfadaha uu ugu howlgalayo si firfircoon deegaankiisa. Ilmaha waxaa loo diyaarinayaa qalabka ay u baahan yihiin iyo adeegyada u turjumidda (kuwa maqalka iyo araga naafada ka ah).

WAXBARASHADA AASAASIGA AH 7 sano-

Cunnug walba iyo dhallinyartaba waxay gudanayaan waxbarashada aasaasiga ah waxbarashadooda oo ah fasalada 1-9. Dadka waaweyn ee iskuulka ayaa ka taageeraya qof walba waxbarashada, waxayna wada shaqeyn la sameynayaan guriga.

Waxbarashada, qadada, qalabka waxbarashada iyo adeegyada dareelka waxbarashadu waa lacag la'aan. Waxbarashada aasaasiga ahi marka ay dhamaato waxaa la dalbanayaa waxbarashooyinka heerka labaad.



Tagitaanka iskuulka ilmahaagu wuxuu kula qabsanayaa dalka Finland. Iskuulka wuxuu kubaranayaa aqoon muhiim ah iyo xirfado. Iskuulka waxaa lagu bartaa sida loola shaqeeyo dadka kale, waxaana lagu tababartaa sida loo qaato masuuliyadda arrimaha qofka u gaarka ah.

Tagitaanka iskuulku waa waddo horumar u horseeda nolosha. Ilmaha ama dhallinyarka waxaa loo diyaarinayaa qalabka ay u baahan yihiin iyo adeegyada turjumaadda.

HEERKA LABAAD

Wajibbaadka waxbarashadu wuxuu sii soconayaa illaa iyo waxbarashada aasaasiga ka dib illaa uu dhallinyarka ka gaadhayo 18 jir ama illaa iyo inta uu markaa dhallinyarku gudanayo waxbarashada heerka labaad. (Waxey u baahantahay inaad degmo ka diiwaan gashantahay)

Fursadaha waxbarashada waxey ka koobanyihiin waxbarashada tababbarka, T waxbarashada aasaasiga ah ee xirfadaha ama waxbarashada dugsiyada sare. Waxbarashooyinka xirfadaha waxey kaa caawinaya sida aad ku hesho xirfad. Waxbarashada dugsiyada sare waxay ku siineysaa aqoon guud oo ballaadhan.

Waxbarashada tayada leh waxaa sii dheer qadada, qalabka waxbarashada iyo adeegyada daryeelka waxbarashada. (Waxey u baahantahay inaad degmo ka diiwaan gashantahay)

Heerka labaad ka dib haddii aad dooneysid waxaad sii dalban kartaa dugsiyada tacliinta sare.

Waa muhiim inuu dhallinyarka helo goob waxbarasho oo xiiso leh kuna haboon. Waxbarashooyinka iyo machadyada waxaa wanaagsan inaad soo barbaratid intaanad dalbanin ka hor. Dhallinyarku wuxuu u baahan yahay in guriga lagaga soo dhiirigeliyo marxaladda nolosha cusub. Machadyada iyo wadashaqeynta gurigu wey sii soconeysaa.

Dhallinyarku marka uu waxbaranayo wuxuu baranayaa masuuliyada iyo xallinta arrimaha. Xirfadahaasina waxay caawinayaan isaga markuu weynaado.

Ardeygu wuxuu taageero waxbarasho ka helayaa machadka. Intaa waxaa dheer oo uu adeegyo ka heli karaa tusaale Kelada ama adeegyada naafada. (Waxey u baahantahay inaad degmo ka diiwaan gashantahay)



valteri.fi/ota-yhteytta



OPETUSHALLITUS
UTBILDNINGSTYRELSEN

[oph.fi/fi/koulutus-ja-tutkinnot/
maahanmuuttotustaustaiset-oppijat](http://oph.fi/fi/koulutus-ja-tutkinnot/maahanmuuttotustaustaiset-oppijat)

